# Dib-u-dhiska saraha dhaadheer

## Su'aalaha & Jawaabaha website ka

20-ka Sebteembar 2024

Somali | Soomaali

## Maxaa lagu dhawaaqay?

Dawladda Victoria waxay ku dhawaaqday goobaha xiga ee dayactirka lagu sameyn doono iyagoo qayb ka ah Mashruuca Weyn ee Guriyeynta Victoria. Goobahani waa:

- **139 Highett Street, Richmond,**
- **259 Malvern Road, South Yarra,**
- **6 iyo 8 Anderson Court Richmond,**
- **1 - 5, 7 iyo 9 Williams Court Richmond, iyo**
- **111, 119 iyo 127 Elizabeth Street Richmond**

## Waxyaabaha lagu dhawaaqay maxay uga dhigan tahay kiraystayaasha iyo bulshada deegaanka?

Kiraystayaasha goobahan ayaa bilaabi doona wadahadalo ku saabsan howlaha guuritaanka si markaas dib-u-dhisku u bilowdo, oo markaas guryo cusub oo bulsho/dowlad loo dhiso.

Kooxdayada raritaanku waxay kala shaqayn doonaan qoys kasta sidii ay ku heli lahaayeen guri ku haboon iyadoo lagu salaynayo baahida iyo dookhyada qoys kasta. Tan waxaa ka mid ah guryaha ku yaal xaafadaha kuu dhow ee aad doorbideyso.

Muddo ayay howlahan qaadan karaan. Waxaan ku dadaali doonaa inaan dhameystirno raritaannada goobahan lagu dhawaaqay bisha Febraayo ee sanadka 2026. Dib-u-dhisku waxay qaadan doontaa inta u dhaxaysa 6 ilaa 8 sano.

## Nidaamka raritaanka sidee buu u shaqeeyaa?

Waxaan fahamsanahay in geedigu noqon karo wax iska dhib badan. Taas ayaana ah sababta kooxdayada dib udejinta ee markasta heegan idiin ah ay ula kulmayaan qoys kasta oo guuraya si ay u fahmaan baahiyaha gaarka ah iyo waxa ay door bidayaan idinkuguna fududeeyaan howlaha guuritaanka. Tani waxay khusaysaa waxyaabaha muhiimka ah ee loo baahan yahay in laga fakiro, sida:

- shuruudaha la xiriira gelitaanka goobta
- adeegyada caafimaadka iyo kuwa bixiya
- dugsiyada, xanaanada carruurta iyo waxbarashada
- xiriirka bulshada iyo mujtamaca aad la leedahay
- isku xirka gaadiidka iyo xiriiradaada.

Kiraystayaasha waxay heli doonaan laba fursadood oo loogu soo bandhigi doono guri ku habboon baahidooda, dookhooda iyo shuruudaha. Taas waxaa ka mid ah in la siiyo guri ku yaal xaafada dookhooda ah.

Markaan usoo bandhigno kireystayaasha guri cusub, waxay markaas helayaan fursad ay kusoo kormeeraan guriga si ay u hubiyaan inuu yahay mid ku haboon. Marka ay kiraystayaashu aqbalaan guriga loo soo bandhigay, kooxdayada raritaanku waxay kala shaqayn doonaan qoys kasta sidii ay ugu qorsheyn lahaayeen maalin ku haboon guuritaanka waxayna ka caawin doonaan howlaha rarista.

Inta lagu jiro howlaha dib u dhiska waan idin la soo socodsiin doonaa wixii soo kordha, laga bilaabo qorsheynta ilaa aad ka helaysaan guri cusub, iyadoo laidinla soo socodsiin doono wixii kusoo cusboonaado mashruuca iyo fursadaha aad nagula wadaagi kartaan ra'yigiina ku aadan naqshadeynta guryaha cusub.

## Homes Victoria miyaa bixin doonta kharashka ku baxaya guuritaanka?

Haa. Homes Victoria ayaa ballamin doona kuwa wax rara isla markaasna bixin doona dhamaan kharashyada guuritaanka, oo ay ku jiraan:

- lacagaha ay qaadanayaan kuwa wax rara
- baakadaha aad ku ridan doonto alaabtaada, tusaale ahaan koolooyinka lagu xiro baakadaha, bokisyada
- lacagaha laguugu soo xirayo adeegyada sida korontada, gaaska, telefoonka, iyo internetka
- kharashka ku baxayo in waraaqahaaga loo soo wareejiyo guriga cusub
- tuurista shay kasta oo aanay kiraysteyaashu doonayn inay ula guuraan guriga cusub.

## Kiraystayaashu ma heli doonaan caawimo dhanka rarista alaaha ah?

Maalinta la guurayo kahor, kiraystayaasha waxaa la siin doonaa baakado iyo alaabo ay ku guuraan sidoo kalena shaqaale alaabta rara ayaa rari doona wixii alaabo iyo bokisyo la rarayo ah.

Homes Victoria waxay sidoo kale idiin diyaarin doonaan isla markaasna qarashkooda bixin doonaan wixii qashin ah oo ay kireystayaashu dooneyn inay sii qaataan waxay kaloona ka caawin doonaan kireystayaasha inay la xiriiraan adeegyada cusub sida korontada haddii ay u guuraan xaafad cusub.

## Kiraystayaashu ma awoodi doonaan inay ku noolaadaan meel u dhow meeshoodii hore mise waxaa la dejin doonaa guryo cusub marka ay howshu dhamaato?

Kireysteyaashu waxay xaq u leeyihiin inay ku noqdaan xaafada ay hada degan yihiin marka dib u dhisku dhammaado iyadoo lagu salaynayo inay markaas yihiin meelo u qalmo, baahiyahooda iyo inay yihiin guryo ku haboon.

Kiraystayaashu waxay sidoo kale dooran karaan inay sii deganaadaan gurigooda cusub haddii uu yahay mid ku haboon, wakhtigaas.

## Sidee bay kiraystayaasha iyo bulshadu uga qayb qaadan doonaan mashruucan?

Inta uu socdo mashruucan waxa aanu dhagaysan doonaa oo aanu la shaqaynayna kiraystayaasha dabaqyada dhaadheer iyo bulshada.

Kiraystayaasha iyo bulshada waxay heli doonaan fursad ay nagula wadaagaan ra'yigooda ku aadan naqshadeynta guryaha cusub, xaafadaha iyo waxyaabo kaloo badan.

## Homes Victoria ma sii wadi doonaan inay kireystayaasha dhageystaan?

Haa. Kiraystayaashayada iyo bulshadeena ayaa ah dadka aan siineyno mudnaanta koowaad inta lagu guda jiro mashruucan waxaana dhagaysanay oo aanu la shaqaynaynay kiraystayaasha si aanu u horumarino Bulshadeena: Qiyamkeena – oo ah mabaadii hagaysa sida aanu ula xidhiidhno aanuna waxkasta uga qeyb gelino kiraystayaasha inta ay socdaan howlaha dib-u-dhiska saraha dhaadheer.

Talaabadeena ugu horeysa waxay noqon doontaa in aan hubino in dhammaan kireystayaasha ay haystaan macluumaad fiican ayna fahamsan yihiin taageerada ay heli karaan.

Kooxdayada guriyaynta ee dadaalka badan muujinaya ayaa soo ururin doona ra'yiga kireytaha iyo bulshada si ay taasi gacan uga geysato qaabaynta qorshayaasha goob kasta. Waxaanu qof walba arimaha ula socod siin doonaa si joogto ah iyo fursadaha ra'yi dhiibashada, heer walba oo mashruuca.

## Maxaa loogu baahan yahay in dabaqyadii hore ee dhaadheerka hawlgab looga dhigo?

Waxaa jirta sababa badan oo aan u doonayno in aan hawlgab uga dhigno guryahaan duqoobey. Waxaa la soo gaaray gabagabadii saraha dhaadheer, oo waqti xaadirkan maaha kuwo buuxinaya heerka ay dadka reer Victoria filan karaan.

Sanadihii ugu dambeeyay cilladaha dhismooyinka iyo burburka (korontada, tuubooyinka, wiishashka) ayaa noqday kuwo aad u badan oo sababay khalkhal joogto ah inay kiraystayaasha kala kulmaan.

Qaabka loo naqshadeeyay dhismayaasha waxay sidoo kale ka dhigan tahay inaysan suurtagal ahayn in la dayactiro si ay ula jaanqaadaan casriga maanta lagu jiro, ku noolaanshaha iyo heerarka gelitaanka.

## Goorma ayuu mashruucani bilaaban doonaa uuna dhammaan doonaa?

Mashruucani si tartiib-tartiib ah ayuu howlgab uga dhigi doona una bedeli doonaa 44-ta dabaq ee dhaadheer ee guryaha dadweynaha ah kana dhisan Melbourne marka la gaaro 2051, kuwaas oo la dhisay intii u dhaxeysay 1950-meeyadii iyo 70-meeyadii.

Dib-u-dhis kasta wuxuu qaadan doonaa lix ilaa siddeed sano in lagu dhammaystiro.

Wadahadalada lala yeelanayo **kiraystayaasha degan South Yarra iyo Richmond** ee lagu qorsheynayo raritaanka waxay bilaabmi doonaan dhawaan iyadoo raritaanku dhamaanayo Febraayo 2026.

Rarista kiraystayaasha degan goobaha ay hawshu ka socoto ee 120 Racecourse Road iyo 12 Holland Court **Flemington** iyo 33 Alfred Street **North Melbourne** meel fiican ayay maraysaa waxaana lagu dadaalayaa in la dhamaystiro Sebtembar 2025.

## Wax isbeddel ah miyaa ku imaanaya xuquuqda ay leeyihiin kiraystayaasha?

Ma jiri doono isbeddel ku imaanaya xuquuqda kiraystayaasha ama ballanqaadka muddada heshiiska kiro. Taas waxaa ku jira kireystayaasha doorta inay sii deganaadaan guryaha ay u guureen.

Sida uu qeexayo Xeerka Kiraysiga Deegaanka ee 1997 (Residential Tenancies Act 1997) dhammaan kiraystayaasha degan guryaha bulshada/dowlada xuquuqdooda waa la ilaaliya.

## Xaggee ayay kiraystayaasha iyo bulshaduba ka heli karaan macluumaad dheeraad ah?

Waxaan si dhow ula shaqeyn doonnaa kireystayaasha iyo bulshada si aan ula wadaagno war cad oo ku haboon xilligaas iyo taageero (ay ku jirto macluumaad ku qoran luuqaddooda) inta ay socdaan howlahan.

Si aad u ogaato wax badan oo ku saabsan waxa hada socda iyo si aad isaga diiwaangeliso wixii kusoo cusboonaado mashruuca iyo kal-fadhiyada is xog wareysiga, booqo www.bighousingbuild.homes.vic.gov.au halkaas oo aad sidoo kale ka heli doonto macluumaad lagu fasiray luqado kala duwan.

Haddii kireystayaashu ay qabaan wax su'aalo ah, waxay awoodaan:

- inay la xidhiidhaan xafiiska guriyaynta deegaanka ama wacaan **1800 716 866** si loogu xiro xafiiska guriyaynta ee xaafadahooda (9am ilaa 5ta Isniinta ilaa Jimcaha). Turjubaano ayaa diyaar ah haddii loo baahdo.
- email enquiries@homes.vic.gov.au
- Ka qaybgal kulamada bulshada ee la tagi karo ballan la'aanta. Waqtiyada iyo taariikhaha waxay ku qoran yihiin websaydkeena bighousingbuild.homes.vic.gov.au waxay kaloona ku dhagan yihiin boorarka dhismaha